



GUNNOOYINKU WAA DIYAAR

Wakhtiga fasaxa ee mushaharka la qaato markaad ugu baahi badan tahay.

Shaqaalaha Maine ee mutaystay waxay codsan karaan ilaa 12 toddobaad oo fasaxa mushaharka la qaato ah iyagoo u marayo barnaamijka **Fasaxa Qoyska & Caafimaaka ee Mushaharka la Qaato** —taasi oo ku siinaysa wakhti aad ku daryeesho naftaada ama dadka kuugu mudan, adigoo caawinaya ilaalinta shaqada iyo dakhligaaga.



Maxaad U Isticmaali Kartaa Fasaxa?

- **Fasaxa Waalidka** — Isbarashada ilme cusub (dhalasho, korsi, ama korin)
- **Fasaxa Daryeelka Qoyska** — Daryeelidda xubin qoys oo qabto xaalad caafimaad oo khatar ah
- **Fasaxa Caafimaadka** — Aan awoodin shaqada sababtoo ah xaalad caafimaad oo khatar ah
- **Fasaxa Qoyska Ciidanka** — U diyaarinta qof ehelka ah shaqo milatari
- **Fasaxa Badbaadada** — U raadinta badbaado naftaada ama xubin qoyska ah oo ku aaddan gaboodfal, qalalaase, ama dagaalid

Sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg loo-shaqeeyahaaga inaad qorshaynayso qaadashada fasax (caadi ahaan 30 maalmood kahor)

Waxay Tani kaaga Dhigan Tahay

- **Wakhtiga fasaxa ee mushaharka la qaato markaad ugu baahi badan tahay**
- **Beddel** mushahar oo qayb ah si markaa dakhligaagu u ahaado mid ilaashan
- **Ilaalin shaqo** haddii aad u shaqaynaysay loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan 120 maalmood oo xiriir ah
- **Ikhtiyaaro Fasax oo Furfuran** — Qaado fasax halmar dhammaantii ama kolba in yar
- **Gunnada ku Raacaysa** — Kula joogaysa xataa haddii aad shaqada beddesho